

Baaritaanada Guriga COVID-19 ee loogu tallogalay Xubnaha OHP



Baaritaanada COVID-19 guriga ee OHP-ayaa ku daboosho.

Laga bilaabo Nofeembar 8, 2021, Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ayaa ku daboolo baaritaanada COVID-19 guriga ee loogu tallogalay xubnaha OHP iyo CAWEM.

- Xubnaha OHP iyo CAWEM oo leh aastaamaha COVID-19 ama la yeeshay xiriir dhow qof qabo COVID-19 ayaa ku qaadi karo baaritaanada COVID-19 guriga.
- Baaritaanada COVID-19 guriga ma badelaan baaritaanka COVID-19 ee lagu sameeyay rugaha caafimaadka iyo sheybaarada.

[Riix halkaan](#) si aad wax badan uga aqrisid ku isticmaalida baaritaanada COVID-19 guriga.

Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa si xoogan ugu soo jeedinayo xubnaha inay la hadlaan dhaqtarkooda haddii ay qabaan aastaamaha COVID-19 ama way gaari karaan.

Xubnaha OHP iyo CAWEM ayaa ku qaadan karo illaa 4 baaritaanada COVID-19 guriga bishiiba iyada oo aan jirin amarka dhaqtarka.

Si loo helo wax ka badan afar baaritaano bishiiba, xubnaha OHP iyo CAWEM waxay u baahanayaan inay helaan amarka dhaqtarka.

- Fadlan la xiriir bixiyaha daryeelkaaga koowaad (PCP) haddii aad u baahantahay wax ka badan afar baaritaanada guriga bishiiba.

Dhammaan noocyada baaritaanada COVID-19 guriga way daboolanyihiin.

OHP waxay ku dabooshaa dhammaan baaritaanada COVID-19 guriga ee ay ansixiyeen Maamulka Cuntada iyo Daawada Mareykanka (FDA), oo ay ku jiraan baaritaanada guriga COVID-19 ee u baahan xiriirka intarneetka ama mobeelka casriga ah si loo aqriyo natiijooyinka.

Ka xulo baaritaanada COVID-19 guriga dukaanka farmashiga ama tafaariiqda.

Xubnaha waa inay la imaadaan COVID-19 baaritaanka guriga ee dukaanka farmashiga si loo bixiyo oo loo ogeysiyo farmashiga inay yihiin xubin OHP ama CAWEM. Xubnaha laguma soo dalacayo baaritaanada COVID-19 ee guriga.

- Sabab la xiriirto saadadka xadidan, ma ahan in dhammaan farmashiyada ama dukaamada tafaariiqda ayaa yeelan karto baaritaanada guriga COVID-19. Xubnaha waxay rabi karaan inay soo wacaan farmashiga ama dukaanka tafaariiqda si ay u weyddiidaan haddii baaritaanada COVID-19 guriga ee la heli karo.
- OHP ayaa daboosho baaritaanada-guriga ee lagu qaaday dukaanka farmashiga, ma ahan baaritaanada onleenka la keenay.

Ma qabtaa su'aalaha ku daboolan OHP?

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan caymiska OHP ee baaritaanka COVID-19 guriga:

- La xiriir CCO. Si loo helo warbixinta xiriirka CCO iyo illaha [riix halkaan](#).
- Haddii aadan ku jirin CCO, soo wac Xiriirinta Daryeelka OHP ee 800-562-4620. Xubnaha Dhaladka Ameerikaanka iyo Dhaladka Alaaskaan oo sidoo kale ka soo wici karo Xiriiriyaha Daryeelka Qabiilka CareOregon 844-847-9320.

Wax badan ka baro wax ku saabsan caymiska OHP iyo CAWEM inta lagu jiro COVID-19.

- [Ka riix halkaan](#) wixii warbixin dheeraad ah oo Xubnaha OHP CAWEM ee COVID-19.
- Ka booqo [bogga OHP COVID-19](#) oo wixii warbixin dheeraad ah.

Haddii aadan laheyn caymiska caafimaadka, codso OHP maanta.

Waad ka codsan kartaa ONE.Oregon.gov.

- Jaalalka bulshada tababaran oo gobolkoo dhan ah ayaa kugu caawin karo buuxinta codsiga. Waa bilaash. Booqo OregonHealthCare.gov si aad u heshid jaalalka bulshada ee aagaaga.

Ma hubo haddii OHP kuu fiicantahay adiga?

- Booqo OregonHealthCare.gov iyo jawaabta su'aalaha baaritaanka. Tan ayaa kugu caawineyso helida barnaamijka sida wanaagsan kuugu shaqeeyo adiga iyo qoyskaaga.

OHP.Oregon.gov

Helitaanka dukumintiga: Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriisi, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. La xiriir Qeybta Isgaarsiinta COVID-19 1-800-699-9075, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us